

Doorashooyinka



- ✔ Muwaadiniinta Mareykanka waxay u coddeyn doonaan Madaxweynaha Mareykanka iyo saraakiisha kale ee la doortay 5 da Nofeembar, 2024. Maalintaan waxaad arki kartaa safaf dhaadheer oo dad ah oo sugaaya inay coddeeyaan. Codbixintu waxay ka dhacaysaa meelaha ay dadweynuhu leeyihiin ama la kontoroolo sida dugsiyada, xarumaha dab damiska iyo kaniisadaha.
- ✔ Inta laga gaarayo Maalinta Doorashada, waxaa laga yaabaa inaad hesho fariimo siyaasas oo qoraal ah ama taleefoono ama dad albaabkaaga ka garaacaya ololaha. Uma baahnid inaad ka jawaabtid waxyaabahaas.
- ✔ Fadlan xusuusnow haddii aadan ahayn muwaadin Mareykan ah, ma coddeyn kartid mana isdiiwaan gelin kartid inaad codeyso, haddii aad sidaas sameysidna waxay yeelan kartaa cawaaqib xumo, oo ay ka mid tahay luminta sharcigaaga ama waxaad wajihi kartaa masaafurin.
- ✔ Dadka Mareykanku waxay si xoogan u dareemayaan murashaxooda Madaxweynaha (Donald Trump ama Kamala Harris). Waxaa laga yaabaa inaad aragto isu soo baxyo ballaaran oo dad ah oo muujinaya taageerada midkoodna musharaxa doorashada kahor ama kadib.
- ✔ Waxaad arki kartaa dadweyne fara badan oo isu soo baxay si ay u mudaaharaadaan ama u dabaal dagaan. Fadlan taxaddar ka yeelo kulammada waaweyn.
- ✔ Haddii aad go'aansato inaad mudaharaaddo fadlan kaligaa ha aadin oo qaado waxyaabaha soo socda: maaskaro, biyo, aqoonsi, nadiifiyaha gacanta, iyo lambarrada taleefoonada degdegga ah.
- ✔ Haddii aad dareento isla markiiba hanjabaad ama aad tahay dhibane gardaro loo geestay, fadlan wac 911. Markaad joogtid meel aamin ah, fadlan la xiriir IRC markaas waxaan ku siin karnaa taageero dheeraad ah ama waxaan kaa caawin karnaa inaad sameysid warbixin booliis.